

Hoormoos "hormones" waa walaxda ashyaada si dabiici ah u sameeyo jirka. Dhiiga wuxuu qaadayaa hoormoonka dhamaan jirka una gudbiyaa unugyada. Unugyada waa qaybahaqaab ugu yar-yar oo ka sameeyan yahay jirkayna oo dhan – waxaa jira malyan unugyada jirka – unugyada maqaarka, unugyada murqaha, unugyada dhiiga iyo noocyo kale oo fara badan. Unugyo gaar ah ayaa ka jawaabo hoormoonka oo leh "**qabtayaasha "receptors"**" hoormoon gaarka ah. Hoormoonka iyo qabtayaasha hoormoonka waxay u shaqeeyaan sida furaha iyo qufolka. Haddii furaha oo ku cabir yahay qufolka, albaabka wuu furmayaa. Haddii hoormoonka ku cabir yahay qabtaha, ka dib waxaa jira waxyaaleynta unuga. Haddii hoormoonka iyo goobta qabtayaasha aysan u dhigmin, ka dib ma jiro wax la fal-galaano.

Qabtayaasha hoormoonka haweynka istarojin "estrogen" iyo barojestertaroon "progesterone" unugyada naaska. Qabtayaasha waxay fartiinta ka helaan hoormoonka kuna diraan waxayna sheegaayan fartiinta waxa lagu sameeyo. Hoormoonka wuxuu u sheegayaan qabtayaasha in ay kiciyaan ama "shidaayo" koritaanka unugyada naaska. Mararka qaarkood, unugyada kansarka naaska waxay kaloo leeyiin qabtayaasha. Istarojin iyo barojestertaroon waxay kordhinayaa unuga naaska caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ah labadaba.

Dhakhtarkaada wuxuu kuu dalbayaa baarista hoormoon qabtayaasha. Baarista waa la fiirinayaa haddii unugyada kansarka oo leeyahay qabtayaasha hoormoonka. Kansarka waxaa lagu magacaabaa "ER-hubaalka (ER-positive)" haddii unugyada kansarka oo leeyahay qabtayaasha hoormoonka istarojinka. Waxaa lagu magacaabaa "PR-hubaalka (PR-positive)", haddii unugyada kansarka oo leeyahay qabtayaasha hoormoonka barojestertaroon. Unugyada kansarka naaska oona laheeyn qabtayaasha "Saliimka (negative)" hoormoonkaas. "ER-Saliimka (ER-negative)" iyo PR-Saliimka (PR-negative)" unugyada aanan ka jawaabin daaweynta hoormoonka.

Kansarka naaska oo leh hoormoonka qabtayaasha, ER-positive iyo PR-positive, waxay aad u badan tahay si fiican ugu jawaabta **daaweynta hoormoonka**. Daaweynta hoormoonka, daawooyinka qaarkood waxay yareeynayaan hoormoonka jirka qaar kalana waxay ka weecinayaan hoormoonka in oo helo qabtayaasha. Tani waxay xadidaysaa koritaanka unugyada kansarka. Tamoksifiin "Tamoxifen (Nolvadex)" waa daawada joojinayso in oo istarojin gaaro hoormoonka qabtayaasha ee unugyada kansarka naaska. Haddii kansarka uusan laheeyn hoormoonka qabtayaasha, weli waxaa jira oo diyaar ah daaweyn si fiican waxtar u leh.